

# YAA MAAMULA BAARKINKA SEATTLE IYO SABABTEE?

Waaxda Gaadiidka ee Seattle (SDOT) waxay maamushaa baarkinnada wadada si ay u taageerto magaalo firfircoon oo leh dad, meelo, iyo alaabooyin isku xidhan.

Booska waddada dhinaceeda ee halka baabuurka la dhigto (siiba safarka, alaab dirida, iyo waxyaabo kale) waa meelo xadidan oo aad loo doonayo. Markaas, waxaanu si feejigan u dheelitirnaa baahiyaha waxtarka leh si aynu ugu rarno dadka iyo badeecaddahaba si waxtar leh, taageerana ahmiyada ganacsiga degmada, oo abuurnaa xaafado lagu noolaan karo.

Taasi waa sababta aanu u maamulno meelaha banaana ee jidka dhinaciisa, u rakibnaa iyo u maamulnaa baarkinnada lacagta ah, rarka, iyo gaadhitaanka xiliga gaaban ee degmooyinka ganacsiga iyo sidoo kale aagaga ka xayiran baabuur dhigashada ee aagaga la daganyahay. Waxaanu si dhow ula shaqaynaa Waaxda Booliska Seattle ee maamusha baarkinka, Waaxda Qorshaynta iyo Horumarinta (ee baabuur dhigashada jidka ka baxsan), Maxkamadda Degmada Seattle, iyo Waaxda Maaliyada iyo Maamulka Adeegyada.

## TIGIDHADA BAARKINKA

Waxaanu rajaynaynaa inaad iska ilaaliso tigidhada baarkinka. Si kastabaha ahaatee, haddii aad tigidh hesho, waxaad haysataa 15 maalmood oo aad wax kaga qabato. Waxaad haysataa afar kala doorasho oo aad lacagta ku bixiso, dhammaan waxaa lagu sheegay dhabarka tigidhka.

### IIMAYL AHAAN GALKA LAGU SIIYAY:

Maxkamadda degmada Seattle, Sanduuqa Boostada 34987, Seattle, WA 98124-4987

**TELEFOON AHAAN:** (206) 233-7000

**ONLAYN AHAAN:** [www.seattle.gov/courts](http://www.seattle.gov/courts)

**QOF AHAAN:** Municipal Court of Seattle (Maxkamadda Degmada Seattle), 600 5th Avenue, Monday–Friday, 8 AM–5 PM

### DHEGAYSIGA MAXKAMADDA

Haddii aad rumaysantahay in tigidh lagugu siiyay si khalad oo aad doonayso inaad kaga doodo tigidhka maxkamadda horteeda, waxaad codsan kartaa dhegaysiga dooda.

Haddii aad aqbasho inaad gashay xad gudubka laakiin aad jeceshahay inaad waydiisato garsooraha in uu yareeyo ciqaabtaada iyaddoo ay u sababtahay duruufo, waxaad codsan kartaa dhegaysiga la khafiifiyey.

**Wixii macluumaad dheeraada ah:** (206) 684-5600 ama [www.seattle.gov/courts/hearings/hearinginformation.htm](http://www.seattle.gov/courts/hearings/hearinginformation.htm)

## TIGIDHADA AAN LACAG LAGA BIXIN

Baabuurta leh afar ama in badan oo ah tigidhada baarkinka oo aan la bixin waxaa lagu xidhi taayirka qalab xaniba. Marka taayirka qalab lagu xanibo, ilaa tigidhka iyo kharashka lagu bixiyo 48 saacadood gudahood, gaahiga waa la jidi doonaa. Wixii macluumaad dheeraad ah: [www.seattle.gov/scofflaw](http://www.seattle.gov/scofflaw)



## WADADA BAARKINKA BAABUURTA LACAGTA LA BIXIYO

Baarkinka gaadhida lacagta la bixiyo waxa uu dhaqan gelayaa laga bilaabo 8 Subximo ilaa 6 fiidnimo ama 8 habeenimo, Isniinta ilaa Sabtida. Qiimayaasha iyo saacadaha waxaa loo habbeeyaa si sanadle ah oo way kala duwanyihiin iyagoo ku salaysan xaaladaha maxaliga ah. Calaamadaha cagaarka ah ee lacagtala bixiyo waxay muujijayaan qiime wanaagsan. Calaamadaha buluuga ah leh 5 Calaamadood ee Ka dambeeya waxay muujinayaan lacag bixinta fiidka in loo baahanyahay. Jidad badan oo mashquul ahi waxay leeyihiin xayiraado baarkinka muddada subaxda iyo socodka jidka fiidkii.

Lacag ku bixinta taleefanka waxaa laga heli karaa dhammaan aagaga baabuurta la dhigto. Kasoo degso aabka PayByPhone kaydkaaga aabka oo ka samayso koontada lacag bixinta baarkinka oo dhaqsi ah waqtina aadna u habboon.

## XIDHIIDHADA IYO QALABKA DIJITAALKA AH

Wixii macluumaad dheeraad ah: (206) 684-ROAD (7623)

Si aad u codsato sarkaalka xoojinta baarkinka wixii aan deg deg ka ahayn: (206) 625-5011

Si looga warbixiyo baabuurta la iskaga tagay: (206) 684-8763

Haddii baabuurkaaga laga jiiday jidka dad waynaha: (206) 364-2000 ama booqo [www.seattleimpound.com](http://www.seattleimpound.com)

Wixii macluumaadka baabuur dhigashada SDOT: [www.seattle.gov/parking](http://www.seattle.gov/parking)

Telefoonka casriga ah ee aabka oo dhan leh ee khariidada baarkinka ee bartamaha magaalada: [www.DowntownSeattleParking.com](http://www.DowntownSeattleParking.com)

Wixii ah macluumaadka SDOT ee booska wakhtiga dhabta ah ee geeraashka: [www.seattle.gov/transportation/epark/mobile](http://www.seattle.gov/transportation/epark/mobile)

# GAARI MA DHIGAN KARAA HALKAN?

Garo calaamadaha, iska ilaali tigidh, u baarkin garee sidii qof khabiir ah.

**Waxaanu ku tusi doonaa sida.**



Seattle  
Department of  
Transportation

# BAARKINKA AAN LA OGGOLAYN

# BAARKINKA WAKHTIYADA QAARKOOD LA OGGOLYAHAY

## LUUQLUUQYADA

Ha ku baarkin garayn ama ha istaagin luuqluuqyada. Baabuurta ganacsiga waa lagu rari karaa/laga dejin rarka ilaa 30 daqiiqadood.

## JOOGSO OO HAAD BANEE

Baabuurka ha dhiginin ujirta 30 fuud meesa joogsiga iyo calaamadaha Haad banaynta, ama gudaha 20 fuud meesha socodka looga gudbo.

## WADOOYINKA GURYAHA AMA

## WADOOYINKA KALE XAAFADAH GAALA

Baabuurka ha dhigan gudaha 5 feet oo wadada guryaha ama wadooyinka kale xaafadaha gala ah. Dadka deegaanka ah/Mulkiilayaasha guryaha waxay ku rinjiyeyn karaan wada kaabada ku dhinactaal jaalle ilaa 5 feet dhinac kasta oo waddo guriga gasha ah.

## QALABKA JIDHKA KU AGYAALA EE DAB DEMISKU ISTICMAALO

Baabuurka ha dhigan gudaha 15 feet ee uu u jiro qalabka jidka ku ag yaal ee dab demisku isticmaalo.

## JIDKA DADKU MARO IYO QAYBTA DHIRTA LEH

Baabuurka ha dhigan jidka dadku maro, qaybta dhirta leh ama halka wada qarqarkeeda ah ee u dhexaysa jidka dadku maro iyo jidka baabuurta.

## IS GOYSKA IYO MEESHA LIIDADKA LEH EE DADKU MARO

Baabuurka ha dhigan gudaha is goyska, ama meesha liidadka leh ee dadku maro, ama gudaha 20 feet u jirta jidka leexadka leh, taas oo ay ku jiri karto is goyska "T". Ka eeg calaamadaha baabuur lama dhigan karo. Meesha leexadka leh ee dadku maro waxaa lagu calaamadayn karaa (rinji) ama laguma calaamadayn karo (rinjina).

5 feet

15 feet

20 feet

30 feet

jidka guriga gala

qalabka dab damiska ee jidka ku ag yaal

meesha liidadka leh ee dadku maro

calaamada joogso/u oggolow kan kale



## AAGA JIIDITAANKA

Ha joogsan aagagan ama aagaga kale oo midab guduudka ah ku rijiyaasan.



## AAGAGA AAN BAABUUR LA DHIGAN KARIN

Baabuur ha dhigan aagagan.



## AAGAGA AAN BAABUUR LA DHIGAN KARIN EE KU MEEL GAAR AH

Baabuur ha dhigan halkan muddada taariikhda la soo dhejiyay iyo wakhtiyada. Soo wac Xafiiska Adeega Macmiilka wixii su'aalo ah (206) 684-CITY.

## AAGAGA KALE EELA QOONDEEYAY

Baabuur ha dhigan aagaga baska, aagaga tagsiga, aagaga basaska kirada ah, ama meelaha baabuurta laga kiraysto.


## BAABUURTA GACANSIGA AH IYO KUWA SAYSKA WAYN

Ha dhigin baabuur wayn/is jiid wax ka badan 80 injis ah jiid kasta ama marin kasta oo dhuuban, laga reebo Aagaga Warshadaha, inta u dhexaysa habeen barka iyo 6 subaxnimo.



## BAABUUR DHIGASHADA DADKA NAAFADDA AH

Baabuur ha dhigan baarinka naafada loo qoondeeyay ama isticmaal oggolaansho: 1) adiga ama rakaabkaagu naafo tihiin, iyo 2) baabuurkaagu waxa uu muujinayaa calaamada naafada oo ku dhegan, taarigo baabuur, ama calaamad. Ganaaxa isticmaalka aan saxda ahayn waa ilaa \$450.



## BAARKINKA LACAGTA LA BIXIYO

Lacagta ayaa loo baahan yahay in lagu bixiyo goobta lacag bixinta ama telefoon ahaan. Calaamada buluuga ah ee leh "5ta Ka dib" calaamada ah waxay muujinaysaa wakhti saddex (3) saacadood ah oo xadidan in lagu ogolyahay 5PM kadib. Calaamadaha cagaarku waxa uu muujinayaa qiime ka wanaagsan oo hoose ama xadid wakhti dheer oo la oggolyahay.




## AAGAGA XAYIRAN EE BAARKINKA (RPZ)

Haddii baabuurkaagu uu leeyahay oggolaanshaha RPZ, waxaad baabuurkaaga dhiga kartaa jidadka leh calaamada RPZ ilaa 72 saacadood. Haddii aanay sidaas jirin, waxaad ku xadidantahay wakhtiga la soo dhejiyay Wac: (206) 684-5086.



## SAACADAH JIDKA MASHQUUL YAHAY

Baabuurka ha dhigan muddada wakhtiyad la soo dhejiyay, ama baabuurkaaga waa la jiid doonaa. Saacadaha xayiran way kala duwanyihiin marka si feejigan u eeg calaamadaha.



## AAGA XADIDAN

Ku baarkin garayso xadka wakhtiga la soo dhejiyay. Waa inaad ka dhaqaajisaa baabuurkaaga meesha (labbada dhinac ee jidka); tusaale ahaan dhinaca xiga ama dhinaca koonaha.




## RARID IYO DEJIN

Dhammaan baabuurta waxey raraan/dejiyaan saacadaha la soo dhejiyo. (midabka kaabada dhinaca jidka: jaale.)



## XAMUULKA RAKAABKA

Dhammaan baabuurta waxay joogsan karaan 3 daqiiqadood si ay u qaadan oo u dejiyaan rakaabka muddada saacadaha la soo dhejiyay. (midabka kaabada dhinaca jidka: caddaan.)



## RARID IYO DEJIN BAABUURKA WAYN

Kaliya baabuurta waa wayn ee ruqsada haysta ayaa rari/dejin kara saacadaha la soo dhejiyay. (midabka kaabada dhinaca jidka: jaale.)



## AAGAGA BAABUURTA XAMUULKA EE GANACSIGA (CVLZ)

Baabuurta ganacsiga oo keliya yaa ku rari karaa/oo laga dejin karaa rarka ilaa 30 daqiiqadood. Mid uun lacag bixin ayaa loo baahanyahay ama oggolaansho ansax ah oo CVLZ. Wac: (206) 684-5103. (midabka kaabada dhinaca jidka: jaale.)

## XAALADAH KALE

### TAARIGADA BAABUURTA IYO CALAAMADAH

Baabuurka ha dhigan meel iyaddoo taarigada baabuurta ee hore ama tan dambe maqan tahay, ama warqadda jid maristu dhacday.

### SHARCIGA 72-SAAC

Ha dhigin baabuurkaaga baarkin isku mid ah in ka badan 72 saacadood oo isku xigta, ama baabuurka waxaa looga fekeri doonaa mid la is kaga tegay oo tigidh ayaa loo jari doonaa ama waa la jiid doonaa.

INTEE U DHOW AYAN GAADHIGA DHIGAN KARAA?